


<p>Tucson Unified School District  <i>Celebrate the US!</i> Tucson, Arizona UJEEDDADA GUDDIGA XUKUNKA GOVERNING BOARD POLICY</p>	<p>CINWAAN UJEEDDO: U Oggolaansho Dugsi Ardeyda Guryo-la'aanta ah</p>
	<p>KOODH UJEEDDO: JFABD</p>
	<p>WAAXDA HOGGAAN: Hoggaan Waxbarasho</p>

Ujeeddadan waxa loogu talagaley iney tilmaan ka bixiso u hoggaansiga Dowladda Gobalka Arizona iyo Shuruudaha Maamulka Arizona iyo Sharciga Gargaarka Horumarinta Waxbarasha Dadka Guryo-la'aanta ah ee soo baxey 2001 oo ah in loo akhristo iney iswaafaqaan dukumeentiyadaas.

Wadajirka Degmada Dugsiyada ee Taksan (Tucson Unified School District) waxay ugu hoggaansamayaan sharciyada korka ku xusan iyada oo:

- dhakhsadiiba ardeyda guryo-la'aantu ku dhacdey la qorayo dugsi ayada oon la eegin dukumeentiyada ka maqan.
- la hubinayo carruurta guryo-la'aanta ah inaan la dhaleeceyn ama la qoqobin iyada oo Isaldhig looga dhigayo xaaladdooda guri-la'aanta ah.
- loo fidinayo gaadiidka ay ku tagayaan ama y ka soo raacyaan “dugisga ay ka soo jeedaan.”

Qeexitaanno

Kalmadda “Ardeyda Guryaha-la'aantu hayso” micnaheedu waa shaqsiyaadka aan haysan meel ay ku noolaadaan habeenkii oo markaana sugan, caadi ah oo ku filan oo waxa ku jira:

- ardeyda dad kale guryaha la gasha kadib markii guri-la'aani ku dhacdey, dhaqaale-xumo, ama dhibaato, ama wax la mid ah, ee markaa ku nool albeergo, xero tiraylar (trailer parks), ama goobaha dibad ahaan loo seexo (camping grounds) kadib marka la waayo meel kale oo ku filan oo lagu noolaado; ama ku nool meel deg-degga loo diyaariyey ama meelaha meel ku gaadhka hoyga loogu diyaariyo; ama lagaga tago cusbitaallada; ama sugaya meelynta korsiga dadka kale;
- ardeyda haysta meel kowaad ooy seexdaan habeenkii oo ah meel dadka ka dhexeysa ama gaar ah oo balse aan loogu talagalin sida caadiga ah iney dadku galaan;
- ardeyda ku dhex nool baabuurta, jardiinooyinka, meelaha dadweynaha, guryaha laga guurey, guryaha tayada caadiga ah hoos uga dhacsan, xarunta basaska iyo tareenka, ama meelaha la midka ah, iyo
- Ardeyda guuraaga ah ee u qalmaa iney xaalad guri-la'aan ah yihiin sabata oo ah iyaga oo carruurtaasi ku noo xaaladaha kor lagu qeexay awgeed.

Kalmadda "**dugsi ayada oo ku filan**" micnaheedu waa dugsi ayada oo ku filan jirey markey lahaayeen guriga ama dugsi ayada oo ku filan uu ardeygu markii ugu danbeysey uu ka qornaa.

Dadka Lagala Xidhiidhi Karo Arrimaha Ardeyda Guri-la'aanta ah

Agaasimaha Adeegyada Beesha Dugsi (The Director of School Community Services) ayaa ah qofka lagala xidhiidhi karo ardeyda guryo-la'aantu hayso oo xilka u fulin doona sida kolba loogu saaro. Shaqooyinka waxa ka mid noqon doona xilka isku-dubbaridka wax-qabyada iyo barnaamijyada iyaga oo eegaya sida ugu wanaagsan eey wax ugu tari

lahaayeen ardeyda guryo-la'aantu hayso laakiin aan ku xaddidneyn aasaaska nidaamyada iney:

- ka sii wadaan waxbarashada ardeydu dugsiga ay ka soo jeedaan wakhtiga ay ku jiraan guri-la'aanta:
 - markasta oo xaaladi ay ku dhacdo qoys in guri-la'aani ku dhacdo inta u dhexaysa sannadaha waxbarasho ama sannadka waxbarashada gudaheeda; ama
 - inta ka hadhey sannadka waxbarashada, haddii ardeygu u helo guri u galo oo waara.
 - In la qoro ardeyga dugsi dadweyne kasta ee ardeyda aan guri-la'aanta ku jirin, ee waliba ku nool agagaaraha ardeygu u ku nool yahay ama xaq u leeyahay/leedahay iney wax ka bartaan.

Danaha ugu Wanaagsan ee Ardeyga Guri-la'aanta ah

Iyada oo la eegayo danaha ugu wanaagsan ee ardeyga guri-la'aantu hayso, ayaa dugsigu:

- inta suurto-gal ah, ardeygu marka hore dugsiga u ka soo jeedo lagu hayo iyada oon ku jirin, arrintaasi markey ka timaad waxay rabaan waalidka ama masu'uulka ardeyga;
- Iyada oo la siiyo faahfaahin qoran, ooy ku jirto weedho ku saabsan xaq in loo leeyahay in rafcaan la qaato, waalidka ama ka masu'uulka ardeyga guri-la'aanta ah, haddii loo diro ardeyga dugsi aan ahayn dugsigii u ka soo jeeday ama dugsi ay codsadeen waalidku ama masu'uulku; iyo
- Marka ay jirto xaallad qof dhallinyaro ah oo aan la wehelin, qofka u qaabilsan la xidhiidhka ardeyda guryi-la'aanta ku jira ayaa ka caawin sidii loo meeleyn lahaa ama dugsiga qoritaankii go'aannadooda, iyada oo la tix-galinayo aragtida qofka dhallintyarada ah ee aan la wehelin, iyo siinta ogeysiis ah ardeygani xuquuqda uu u leeyahay rafcaanka.

La ansixiyey: March 8, 2005

Dib looga shaqeeyey:

Dib loogu fiirsadey:

SHARCI TIX-RAAC: A.R.S. [15-816](#) ilaa [15-816.07](#)

[15-821](#)

[15-823](#) ilaa [15-825](#)

[42 U.S.C. 11301](#), Qaannuunkii McKinney-Vento Caawinta Guri-la'aanta ee sannadkii 2001

Iskaga-gudub Tix-raac: [EEAA](#) - Lugeeyayaasha iyo Gaaadiid-raacayaasha

[IKEB](#) – Aad-u-Dadajin

[JF](#) – Ardey Dugsi u Oggolaansho

[JFAA](#) - U Oggolaansho Ardeyda Deggannaanta (Resident Students)

[JFAB](#) - U Oggolaansho Ardeyda Deggannaan la'aanta ah (Nonresident Students)

[JFB](#) – Dugsi Qoritaan Furan

[JG](#) - Ku Hagaajinta Ardeyda Fasallada iyo heerarka darajo

[JLCB](#) – Tallaalka Ardeyda

[JLH](#) – Ardeyda Maqan

[JR](#) – Diiwaanka-galinta Ardeyda

[JRCA](#) - Request for Transfer of Records Codsashada Soo Wareejinta Diiwaan-galeenka Waxa u beddleyaa Ujeeddooyinka TUSD #